Daroogada – Hel xaqiiqda

Horudhac

U soo haajirida dal cusubi waxay noqon kartaa wax ku adag dhammaan xubnaha qoyska. Waalidiinta, waxaa heysta loolamo farabadan iyo caqabado ah inay wajahaan iyagoon haysan nidaamka caawimada ee caadiga ah ee saaxiibada iyo qoyska balaaran. Carruurta, waxa sidoo kale jira dhibaatooyin, sababtoo ah waxyaalaha waalidiintood laga dalbayo ayaa ka badan.

Dawlada Gobolka Fiktooriya waxay siisaa macluumaad iyo istaraatijiyo ku saabsan daroogada waalidiinta leh carruurta dhalinyaada ah si siwanaagsan loogu diyaariyo oo ay uga jawaabaan arimaha daroogada. Dawladu waxay dooneysaa inay caawiso dhammaan waalidiinta, oo ay ku jiraan waalidiinta soo haajiray, inay ka hortagaan dhibaatooyinka daroogada.

Talooyinka ka hortaga

Tijaabintu waa qayb dabiici ah oo ka mid ah koritaanka. Ugu dhawaan dhammaan dhalinyaradu waa tijaabiyaan aalkolada iyo sigaarka. Qaar waxay ku dari doonaan oo ay tijaabin doonaan daroogada sharci darada ah. Talaabooyinka ka hortaga ee ugu waxku oolsani waa wada hadal wanaagsan iyo la samaysadka xiriir xoog badan carruurtaada. Halkan waxaa ah talooyin kale.

LAHOW KU DAYASHO WANAAGSAN

Carruurtu way helayaan daroogada sharciga ah sida aalkolada iyo sigaarka marka ay yar yar yihiinba waxayna ka bartaan dabeecada waalidkood. Carruurta waalidkood sigaarka cabo ama khamrada cabo aad bay ugu dhow yihiin inay sigaarka iyo khamradaba cabaan iyaga laftigoodu.

OGSOONOW

Diyaar u how inaad si furan oo daacad ah uga hadasho arimaha daroogada. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu wax badan ka yaqaan daroogada iyo waxyeeladeeda oo ka badan inta aad adigu ka taqaano, saa daraadeed ogow xaqiiqda wakhti hore. Ha buunbuunin khataraha daroogada ama ha isku deyin inaad cabsiiso carruurtaada, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay joojiyaan dhegeysigaaga.

DHEGEYSO

Dhegeyso ilmahaaga dhibaatooyinkiisa ama wuxuu dareemayo. Ha ku boodin. Haddii ilmahaagu kula hadli karo, way yar tahay inay dhib yeeshaan ama inay sameeyaan go'aamo nacasnimo ah.

HADAL

Kala hadal arimo maalmeedka caruurtaada sidii ay yihiin dadwaaweyn. Haddii aad carruurtaada kala hadasho dugsiga si joogta ah, saaxiibada, cayaaraha ama muusikada ay jecelyihiin, ma adkaan doonto in laga wada hadlo qodobada dareenka leh sida daroogada.

HORUMARI KALSOONIDA

Waa inaad ku kalsoonaataa oo aad aamintaa carruurtaada. Ha su'aalin go'aankooda. Badanaa carruurtu waxay doonayaan inay u cadeeyaan waalidkood in lagu kalsoonaan karo waxyaalaha ay doortaan. Kala hadlida carruurtaada daroogada kuma abuuri karto xiiso.

U XAQIIJI ILMAHAAGA INUU OGAADO INAAD KA TAXADAREYSO

Tus carruurtaada inaad ka taxadareyso iyaga. Isku day inaad la qaadato wakhtiga madadaalada carruurtaada qoys ahaan.

DEJI HESHIISYO

Hore usii qorshee xaaladaha dhibka leh sameena heshiisyo la aqbali karo oo ku saabsan daroogada iyo khamri cabida. Yeel inaad carruurtaada soo kaxeyso ka dib marka ay khamri soo cabaan intii ay iyagu gaari soo kaxeysan lahaayeen ama cid kale oo cabsani ay soo kaxeyn lahayd. Qayb ka mid ah heshiisku waa in waalidku uu iman doono isagoon wax xanaaq ah keeneyn. Wax kawa dahalka oo dhami waa inay sugaan ilaa maalinta ku xigta.

Noocyada daroogada

Meesha ay khamrada iyo sigaarku ay ka yihiin sharci iyo sidoo kale wax aad "raali looga yahay" , waxay sidoo kale noqon karaan kuwa u khatarsan oo loo qabatimi karo sida daroogada aan sharciga ahayn.

Shan daroogo oo ay waalidku wax ka qabaan:

HEROIN – waa dejiso waxyeesha waxla socodka iyo garashada qofka iyo iskuxirkiisa. Herowintu waxay hoos u dhigtaa qofka awoodiisa uu uga jawaabi lahaa xaaladaha uusan fileynin.

ECSTASY – ('daroogada haflada') waxaa loo qaataa kiniini ahaan. Ecstasy waxay boobsiisaa habka neerfaha dhexe waxayna dhalisaa dhalanteed.

MARIJUANA – waa caleenta cannabis oo la qalajiyey oo badanaa lagu qaso tubaakada lana cabo. Inkastoo ay tahay sharci daro waxay u arkaan qaar ka mid ahi dhalinyarada waxaan dhib lahayn.

ALCOHOL – oo uu ku jiro biirku, khamriga, isbiiritada, waa u sahlan tahay dadka ka hooseeya 18 sanno inay helaan. Dadka dhalinyarada ahi dabool kama saarna aalkolada waxaana laga yaabaa inay isticmaalaan xitaa inkastoo da'da ugu yar ee sharci ahaan iibsan kartaa inay tahay 18.

TOBACCO – inkastoo sigaar cabidu uu dhaliyo waxyeelo khatar badan oo caafimaad, dad dhalinyaro ah oo fara badan waxay u maleynayaan inay tahay shey 'qabow' in la sameeyo.

Qaar ka mid ah calaamadaha digniinta ah

Dhib ayay noqon kartaa u sheegida ilmahaaga inuu leeyahay dhibaato daroogo sababtoo ah waxyeeladu aad bay u kala duwan tahay. Mar marka qaarkood dabeecada la xiriirta daroogada waxay u muuqan kartaa sidii dabeecad adag oo dhalin yaro.

Waxyaalaha aad fiirineyso waxaa ku jira:

- Isbedel qaab
- Banaanka ku maqnaanta habeenka oo dhan
- Darajada dugsiga oo hoos u dhacda
- Dhibaato uu boliiska kala kulmo ama dugsiga
- Isbedel deg deg ah oo saaxiibadeed
- Baahi lacageed oo aan wax sharaxaada lahayn

Maxaan sameynayaa haddii aan ogaado in ilmaheygu isticmaalayo daroogo?

WAXBA HA ARGAGIXIN: Fariiso oo kala hadal qodobka ilmahaaga iskuna day inaad fahanto oo aad caawiso. Isku dayida daroogadu lagama maarmaan ma aha inay kuu hogaamiso isticmaalkeeda ama si xun u isticmaalideeda.

TUS WAXAAD DANEYNEYSO: U cadee ilmahaaga inaad jeceshay iyo qaadashada daroogadu inay dhalin karto khatar.

DOORO WAKHTIGAAGA: Ha isku dayin inaad kala hadasho daroogada ilmahaaga marka uu sakhraansan yahay ama uu daroogo cabsan yahay. Kala hadal marka qof waliba si wanaagsan wax u kala garanayo ee maalinta ku xigta.

GARO DHIBAATOOYINKA: carruurta waxaa laga yaabaa inay tijaabinayaan daroogada sababtoo ah waxay qabaan dhibaato ama waxay ubaahan yihiin caawimo iyo taageero. Isku day inaad ka hadasho dhibaatada dhabta ah raadsana caawimo aqoon leh haddii loo baahdo.

HA EEDEYNIN NAFTAADA: Haddii ilmahaagu isticmaalayo daroogo, taa micnaheedu ma aha inaad guuldareysatay waalid ahaan. Dad dhalinyaro ah oo fara badan ayaa noqda sidan iyadoo loo eegeyn sida waalidkood uu yahay mid ka taxadaraya oo taageeraya.

CAAWIMO RAADSO: Arimaha daroogada looguma xalin karo si ku filan sidii koox qoyseed gooni ah oo kale- waa muhiim inaad hesho caawimo aqooneed. Marka ugu horeysa haddii inaad caawimo hesho ayaa ka fiican.

Adeegyada

Dawlada Gobolka Fiktooriya waxay maalgelisaa tiro adeegyo ah oo loogu talo galay dadka isticmaala daroogada iyo dhibaatooyinka la xiriira aalkolada, qoysaskooda iyo xanaaneeyayaashooda. Adeegyadani waxay ku kala duwan yihiin adeegyada la talinta ee kuwa isticmaala daroogada iyo qoysaskooda (oo ay qabtaan shaqaalaha bulshadu, aqoon yahanada caafimaadka, dhakhaatiirta cilmi nafsiga, iyo dhakhaatiirta guud) meesha aan u baahneyn u dirida, iyo dakhaatiirta takhasuska ee ubaahan u soo gudbin ka timaada dhakhaatiirka guud (tusaale. Dhakhtarka takhasuska ee adeegyada daawada ka jebisa qofka inuu qabatimo herowinta)

Tirooyinkan adeegyada ahi waxaa loogu talagalay baahida kala duwan ee macaamiisha. Adeegyada qaarkood ayaa lagu siiyaa dadka guryahooda (tusaale. Dib uga noqoshada guriga ku salaynsan, dib uga noqoshada bukaan socodka). Adeegyada degaanada ayaa laga heli karaa meesha ay dadku ku nool yihiin bulsho daawo dhexdeeda si ay u caawiyaan iyaga dhaqan celintooda (tusaale. Ka noqoshada degaanka, dhaqan celinta degaanka, guryaha la taageero).

Waxaa jira macluumaad aad u badan oo laga heli karo qodobka daroogada oo aad ka heli karto adoo wacaya **1800 888 236** ama adoo gelaya website kayaga **www.drugs.vic.gov.au**

Ama haddii aad dooneyso inaad qof kula hadasho Somali, waxaad weci kartaa Golaha Samafalka Australian ka Afrikaanka ah (African Australian Welfare Council) **9380 9156**.

"Waa dhibaatadeena daroogo"